# Dad kala sooca iyo Khashkhashaadaha Shaqada ka dhaca

Discrimination and Harassment at Work

## Waa kuwee khashkhashaadaha iyo dad kala sooca ah sharci darada ahi?

Ma aha in cidina si ka duwan dadka kale kuula dhaqanto, ay diido in ay shaqo ku qorto, ay lacag ka yar tan dadka kale la siiyo ku siiso, ay ku siiso shaqooyinka ka duwan kuwa dadka kale, ku khashkhashto, hoos kuu celiso ama ay shaqada kaa erido iyadoo sababatu tahay arrimahan mid ka mid ah.

- Qolo
- Lab iyo dhadig
- Midab
- Caqiido
- Diin
- Uur
- Qoys xaaladii
- Guur
- Qaadasho cayr
- Naafanimo
- Da'da
- La Galmoodka Raga iyo dumarka
- Jinsyad ahaan cida aad tahay
- Akhbaarta Hiddaha
- Qoomiyada loo dhashay (laakiin waa ay ku waydiin karaan cadeyn ah in laguu ogol yahay inaad ka shaqeyso wadanka Mareykanka (U.S.).

Shaqada lagaama eryio karo, laguna khashkhashi karo, si xuna laguu lama dhaqmi karo inta aad shaqada ku jirto iyadoo sababatu tahay masalifid awgeed. Musalifidu waxaa dhici karta in ay qayb ka tahay sababta aan SHAQADA laguu qorin, laakiin ma noqon karto sababta kaliya.

## Maxay yihiin tusaalayaasha guud ee muujiya dad kala sooca iyo khashkhashaada?



- Dalacsiinta la siiyo kaliya shaqaalaha cadaanka ah, in kastoo shaqaalaha jinsiyadaha kale ka soo jeedaa ay qabtaan tababaro, waayo aragnimo iyo shaqo qabad la mid ah kuwa cadaanka.

- Shaqada, oo shaqaalaha aad wada shaqeysaani ay kuugu yeeraan magacyo cay ah oo cunsuri ah. Kormeerahaaguna uu og yahay uunana wax ka qaban.

- Aad waydiisato qolada shaqada qol banaan oo aad ku tukato xiliga nasiinada ayna ku yiraahdaan maya kuma siinayno, laakiin ay u ogolaadaan shaqaalaha kale in ay isticmaalaan qolkaa xiliga nasiinada. Taasi waxa ay noqon kortaa dad kala sooc diin ku salaysan.

- Kormeerahaagu uu kaa codsado inaad dibada isu raacdaan si uu kuu shukaansado ama uu yiraa wax adiga kugu saabsan oo galmada la xiriira. Adiguna aadan doonayn in aad xiriir shukaansi ah la yeelato aadana jeclaynsan hadalkiisa. Kolkaa hor-jeeguhu ku yiraa hadii aadan waxa aan rabo aanan kaa helin lacag kordhin ma heli doontid.

- Qolada shaqadu ma dalacsiiso haweenka xaasaska ah waayo waxa ay is yiraahdaan haweenkaasi uur bay yeelan ka dibna shaqada waa ay ka tagi doonaan. Ama aysan dalacsiinin waalidiinta ilmaha yar yar haysta waayo waxa is yiraahdaan waxa ay mas'uuliyada ilmahu carqalad ku noqon mas'uuliyada shaqadooda.

- Maamulahaagu uu kugu qayliyo, uuna kuula dhaqmo si ka xun sida uu u la dhaqmo shaqaalaha kale waayo afka Ingiriiska si fiican uguma aad hadashid.



- Qolada shaqadu ay hoos kuu celiso kolka aad gaarto da'da 56, ka dib kolka aad shaqadaa ka shaqeynaysay muddo 20 sanno waayo waa aad ka "waynaatay da'dii aad wax cusub ku baran lahayd."

## Maxaan sameeyaa hadii dad ka soocid iyo khashkhashaad la igu sameeyo?

Hadii dad ka soocid ama khashkhashaad ay kugu sameeyso qolada shaqadu iyadoo sababtu tahay, jinsiyadaada, firkaaga, diintaada iwm., waxaad u baahan tahay inaad ugu soo sheegto kormeere ama Xafiiska Shaqaalaha sida si ugu dhaqsaha badan. Hadii aad haleeli karto qoraal ahaan dacwadaada u gudbi. Koobina kala har.

## Maxaan ka sameyn kartaa khashkhashaada iyo dad kala soocida?

- Qor wixii adiga kugu dhaca ee aan xaq ahayn.
- Qor maalinta iyo waqtiga, iyo macagyada cidii kale ee meesha joogta.
- Qoraal ka sameey hadalka uu yiraahdo, iyo wixii aad is tiraahdaan kormeeraha.
- Iyadoo qoraal ah u soo gudbi kormeerahaaga wixii walaac ah ee aad qabto ee la xiriira dad kala soocida.

## Ma dhib baa iga soo gaaraya hadii aan ashtakoodo?

Maya. Qolada shaqadu wax kuuma sheegan karto (aar goosasho) hadii adigoo daacad ah aad sheegato in aad tahay dhibane dhib ku soo gaaray dad kala soocid iyo khashkhashaado sharci darro ah. Hadii shaqada lagaa eryo ka dib kolkii aad soo sheegtay dad kala sooc, waxaa laga yaabaa in aad ku dacaweyn karto qolada shaqada arrintaa.

**Mar marka qaarkood waa ay adag tahay in la cadeeyo waxa dad kala sooca ama khashkhashaadu tahay ama waxa aysan ahayn. Hadii aad aaminsan tahay in dad ka soocid ama khashkhashaad laguu geystay, wac mid ka mid ah hay'adaha hoos ku xusan.**

Dacwaha ku saabsan sheegasho in dad kala soocid iyo khashkhashaad la sameeyey waa in lagu xareeyaa muddo cayiman gudaheed ka dib kolkii dhibku dhacay. Mudooyinkaasi waxa ay ku xiran yihiin kiiskaaga iyo hay'ada aad ka xareysay. **Laakiin mudada waqtiga ah ee la haystaa waa ay gaaban tahay.** Hadii aadan degdeg u wicin waxaa dhici karta in aad dhumiso fursadii aad xaquuqdaada ku ilaalin lahayd.

Wixii akhbaar ah oo dheeraad ah ama si lagaaga caawiyo dacwadaada wac hay'adahan:

**Minnesota Department of Human Rights**
Freeman Building
625 Robert St. North
St. Paul, MN 55155

telefoonka: (651) 539-1100 or 1-(800) 657-3704
TTY: (651) 296-1283
http://mn.gov/mdhr/

**Equal Employment Opportunity Commission**
330 South 2nd Ave., Suite 720
Minneapolis, MN 55401

ttelefoonka: (612) 335-4040
TTY: (612) 335-4045
www.eeoc.gov

**Minneapolis Department of Civil Rights**
City Hall, Room 239
350 South 5th St
Minneapolis, MN 55415

telefoonka: (612) 673-3012
TTY: (612) 673-2044
http://www.ci.minneapolis.mn.us/civilrights/complaint/index.htm



***Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto.*** *Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.*

© 2020 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixi aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo istimaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**